# Nidaamka lacag Bixinta iyo siyaasada qidmada

## 14.A Hordhac

14.A.1 Qaybta C ee Sharciga Waxbarshada Shakhsiyaadka Naafada ah (IDEA) waxaa u qaabeeyey Golaha Koongareesku inuu noqdo mid dhammaystiran, iskudhafan, nidaam isdhaxgal oo adeegyada dhallaanka iyo socod-baradka naafada ah. Koongarasku wuxuu garawsaday inay jireen barnaamijyo hore u jiray oo u adeegayey shacabkaan isla markaana Qaybta C loogu talagalay in lagu bixiyo kaabayaasha isku xidhka barnaamijyadan oo dhan. Sidaas darteed, maalgelinta Qaybta C waxaa loogu talagalay in looga faa iideysto ilaha maalgelinta ee dawladda dhexe, Gobolka iyo Maxalliga oo ay ku jiraan caymiska dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Sababta oo ah ma jirto lacag ku filan oo dadweynaha loogu talagalay in lagu daboolo dhammaan kharashaadka waxkaqabashada hore, ma aha in dhammaan adeegyada wax ka qabashada soo hormara lagu bixin karo kharashka dadweynaha. Qoysaska waxaa laga filayaa inay dhaqaale ku tabarucaan barnaamijka ilmahooda. Rajadaan waxaa lagu buuxin karaa iyadoo lasiinayo hab lagu helayo daryeelka caafimaad gaarka looleeyahay /caymis iyo Apple Health oo loogu talagalay Caruurta / Medicaid adeegyadan wax ka qabadka hore ee ku saleysan shuruudaha Ka qeybgalka Qiimaha Qoyska ee ESIT.

14.A.2 Waxaa ay waajib kutahay Barnaamijka Taageerida xiliga Hore ee dhallaanka iyo socod-baradka (ESIT) in kor loogu qaado isticmaalka dhammaan agabyadan si loogu adeego tirada ugu badan ee dhallaanka iyo socod-baradka naafada ah iyo qoysaskooda. Waxa kale oo ay waajib kutahay ESIT in ay hubiso in agabkyadaan loo isticmaalo bixinta adeegyada wax ka qabashada goor hore oo ku filan bixinta waxtarka horumarka ilmaha. Si ESIT u sii waddo shuruudaheeda u-qalmitaanka ballaaran, adeegsiga dhammaan ilaha maalgelinta la heli karo, oo ay ku jiraan caymiska guud, caymiska gaarka ah iyo khidmadaha ayaa muhiim ah.

14.A.3 Haddii loo baahdo in laga hortago dib-u-dhac ku yimaada bixinta waqtiga loogu talagalay adeegyada wax-ka-qabashada hore ee ku habboon ubadka ama qoyska cunugga, ESIT waxaa laga yaabaa inay u adeegsato miisaaniyadaha hoos yimaada Qeybta C ee IDEA inay ku siiso bixiyaha adeegyada iyo howlaha la oggolaaday, (oo ay ku jiraan adeegyada caafimaadka, sida lagu qeexay 34 CFR §303.16, [laakiin maahan adeegyo caafimaad], howlaha nidaamka maaliyada cunugga ee lagu sharxay 34 CFR §§303.115 illaa 303.117 iyo §§303.301 illaa 303.320, iyo qiimeynta iyo hubinta ee §303.321), magdhawga lasugaya hay'adda ama hay'adda leh mas'uuliyadda ugu dambeysa bixinta lacag.



## Kala soo xiriir:


**The Washington State Department of Children, Youth & Families Early Support for Infants and Toddlers Program**
P.O. Box 40970
Olympia, WA 98504-0970
Teleefon lacag la'aan ah: 1-866-482-4325
**www.dcyf.wa.gov**


*Hadaad jeceshahay koobiyada dukumintiga qaab kale ama luqad, fadlan la xiriir DCYF Xiriirka Xalqadaha (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*


DIIWAANKA DCYF FS_0033 SM | DEL 11-019 (01-2020)

## 14.B Sharci

**14.B.1 Hawlaha iyo adeegyada Lagu Bixiyay Kharashaadka Dadweynaha**

(a) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.521 (b) (2011), IDEA soo socota, howlaha Qeybta C iyo adeegyada waa in lagu bixiyaa qarash dadweyne iyadoo ay bixinayso Barnaamijka Taageerada Xiliga hore ee Dhallaanka iyo socod baradka (ESIT) iyo adeegga bixiyeyaasha iyo in qooysaska aan wax lacag ah laga qaadin:

(1) Hirgelinta canugga, karaadi shuruudaha gudaha §§303.301 illaa 303.303.

(2) Qiimeynta iyo hubinta, iyadoo la raacayo §303.320, iyo howlaha la xiriira qiimeynta iyo hubinta ee §303.13(b).

(3) Adeega isku duwida adeegyada (iskuduwida agabyada qoysaska), sida lagu qeexay §§303.13 (b) (11) iyo 303.33.

(4) Howlaha maamulka iyo isuduwidda ee la xiriira—

(i) Horumarinta, dib u eegista, iyo qiimeynta IFSPs iyo kumeelgaarka IFSPs iyadoo la raacayo §§303.342 illaa 303.345; iyo

(ii) Hirgelinta Qayb E, Ilaalinta Nidaamka, iyo qaybaha kale ee nidaamka gobolka ee adeegyada waxkaqabashada xiliga hore ee Qaybta D ee 34 CFR §303.

(b) **Balan qaad:** Iyada oo la raacayo 34 CFR§303.521 (a) (4) (ii), haddii qoysku buuxiyo qeexitaanka “awood la'aanta in la bixiyo qarash”, dhammaan adeegyada Qaybta C ee lagu aqoonsaday IFSP-da ubadkooda waa lasiinayaa doonaa qoyska aan qarash laga qaadin. Intaa waxa dheer, awood la'aanta qoysku ee bixinta lacagta ma keenayso dib u dhac ama in la diido adeegyada Qaybta C.

**14.B.2 Hawlaha iyo Adeegyada laxariira lacagta Kaqeybgalka Qoyska (FCP)**

(a) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.521(b), howlaha iyo adeegyadan soo socdaa waxaa ay laxariiraan lacagta Kaqeybgalka Qoyska iyo wadaaga-bixinta lacagaha wadaaga-caymiska, ama khidmadaha ayaa laga qaadi doono qoysaska:

(1) Aaladda Tikniyojiyada Caawinta

(2) Adeegga Teknolojiyada Caawinta

(3) Adeegyada Maqalka

(4) Latalin

(5) Adeegyada cafimaadka

(6) Adeegyada kalkaalinta

(7) Adeegyada Nafaqada

(8) Shaqada daaweeynta jirka

(9) Daaweynta jirka

(10) Adeegyada cilmi-nafsiga

(11) Adeegyada Shaqada Bulshada

(12) Adeegyada Barashada Luqadda-Hadalka

(b) **Balan qaad:** Sida ku cad 34 CFR §303.521 (a) (4) (iii), qoysaska lagama qaadi doono wax ka badan qiimaha dhabta ah ee adeegga wax ka qabashada hore ee Qeybta C taasoo ku saleysan lacagta kaqeybgalka Qoyska (iyadoo laguxisaabinaayo qaddar kasta oo lagahelo ilo kale ee maaliyadeed oo loo qoondeeyay bixinta adeeggaas).

**14.B.3 Ilaha Maalgelinta kuwaasoo Lagu mideeyay Nidaamka Lacag Bixinta Lacag Bixinta Washington iyo Khidmadaha Adeegyada waxkaqabashada Xiliga Hore ee Ku Saabsan lacagta kaqeybgalka Qoyska.**

Waxaa lagarajeeynayaa qoysaska dhan oo hela adeegyo ku xiran lacagta kaqeybgalka Qoyska ineey kutabaruci doonaan dhaqaale ahaan adeegyada carruurtooda iyagoo adeegsanaya dheefaha ceymiska dadweynaha, dheefaha caymiska gaarka loo leeyahay, ama iyagoo bixinaya lacag lakiin kumajiraan qooysaska lago'aamiyay ineysan awoodin bixinta lacagtaas Sidaas darteed, ilaha soo socda ee maaliyadeed ayaa lagu soo daray Nidaamka bixinta lacaga iyo siyaasada khidmooyinka:

(a) Caymiska Daryeelka Caafimaadka Dadweynaha / Caymiska (Caafimaadka Apple ee loogutalagalay Caruurta / Medicaid)

(b) Caymiska Caafimaadka ee Khaaska ah / Caymiska

(c) Khidmooyinka.

**14.B.4 Dakhliga Qoyska iyo Macluumaadka qarash gareeynta**

(a) Kahor derista biilka caymiska dadweynaha ama kan gaarka ah, qoysaska waxaa la siin doonaa Nidaamka Bixinta lacagta iyo Siyaasada Khidmadaha ee ESIT. Qoysaska waxaa la weydiin doonaa inay buuxiyaan, sida ku habboon, Ogeysiiska Qoraalka ah ee Hore, Oggolaanshaha Helitaanka Caymiska Dadweynaha iyo / ama Caymiska Gaarka ah, iyo Foomka Xaqiijinta Dakhliga iyo Kharashaadka.

(b) Isuduwaha Kheyraadka Qoyska (FRC) wuxuu ka caawin doonaa qoysaska dib u eegida iyo dhameystirka Ogeysiiska Qoraalka Hore, Oggolaanshaha Helitaanka Caymiska Dadweynaha iyo / ama Caymiska Gaarka ah, iyo foomka Xaqiijinta Dakhliga iyo Kharashaadka, hadba sida ku habboon.

(c) Ogeysiiska Qoraalka Hore, Oggolaanshaha Helitaanka Dadweynaha iyo / ama Caymiska Gaarka ah, iyo Foomka Xaqiijinta Dakhliga iyo Kharashaadka waxaa loo gudbin doonaa qoyska ay FRC u igmatay.

(d) Haddii dakhliga qoyska iyo macluumaadka kharashaadku ay keenaan dakhli sanadeed la habeeyay oo ka hooseeya 200% Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL) oo ku saleysan tirada qoyska, qoyska loogama baahna inay bixiyaan khidmadaha caymiska, wadaagga caymiska, qarashka loojaro caymiska, ama khidmada bilaha ah. Hay'adaha kale ayaa maalgaliya ama maalgelinta Qaybta C ee ah bixiyaha ugu dambeeya ayaa loo isticmaali karaa in lagu daboolo kharashyadan.

(e) Haddii dakhliga qoyska iyo macluumaadka kharashaadku ay keenaan dakhli sanadeed la habeeyay oo ka sarreeya 200% FPL oo ku saleysan tirada qoyska, haddii lagu dabaqi karo, qoyska waxaa laga rabaa inay bixiyaan caymiska wada-bixinta, wadaaga-caymiska, qarashka loojaro caymiska, ama khidmada billaha ah .

**14.B.5 Isticmaalka Caymiska Daryeelka Caafimaadka Dadweynaha / Caymiska (Apple Health ee Caruurta / Medicaid)**

(a) Sida ku xusan 34 CFR§303.520(a)(2)(i), qoysaska ka diiwaangashan barnaamijka waxkaqabashada xiliga hore ee ESIT loogama baahna inay kubiraan ama iska diiwaangeliyaan Apple Health ee Caruurta /Medicaid, si ay uguhelaan caruurtooda adeegyada waxkaqabashada xiliga hore Qaybta C.

(b) Sida ku xusan 34 CFR§303.520(a)(3), qoysaska waxaa la siin doonaa Nidaamka bixinta lacagaha iyo Siyaasada khidmooyinka ee ESIT kahor isticmaalka dheefaha caruurta ama waalidka ee dadweynaha ama caymiska si loogu bixiyo adeegyada Qeybta C.

(c) Iyada oo la raacayo 34 CFR§303.520 (a) (2) (ii), Bixiyeyaasha wax ka-qabashada hore waxay heli doonaan oggolaansho qoys haddii helitaanka Apple Health ee Caruurta / Medicaid ay sababi doonto mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

   (1) Hoos u dhac mudada kujirida caymiska ama dheefkasta oo kale ceymisan ee cunugga ama waalidka ee hoos yimaada barnaamijkaas;

   (2) Aysababto in caruurta walidkood ay bixiyaan adeegyo kuwaas oo lagu bixin lahaa dheefaha dadweynaha ama barnaamijka caymiska

(3) Aysababto kor ukac lacagta ceymiska ama ka joojinta dheefaha dadweynaha ama caymiska ilmaha ama waalidiinta; ama

(4) Khatar kukeenta luminta u qalmitaanka cunugga ama waalidka canugga guri iyo jaaliyadaha ku saleysan bulshada oo ku saleysan kharashyada laxiriira caafimaadka.

(d) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520 (b) (1), markay qoysasku leeyihiin labadaba Apple Health ee Caruurta / Medicaid iyo caymiska gaarka loo leeyahay, bixiyayaasha wax ka qabashada xiliga hore waa inay helaan ogolaanshaha waalidka:

(1) Adeegsiga caymiska daryeelka caafimaad ee gaarka ah ee qoyska / caymiska si loogu bixiyo siinta adeegyada wax-ka-qabashada xili hore ee kujira IFSP;

(2) Adeegsiga caymiska daryeelka caafimaadka ee gaarka ah ee qoyska / caymiska si loogu bixiyo koror kasta ee inta jeer,baaxada, muddada ama xoojinta adeegyada IFSP-da ilmaha.

(e) **Balan qaad:** Sida ku cad 34 CFR §303.521 (a) (4) (iv), qoysaska leh ceymiska dadweynaha ama dheefaha laguma soodalici doono in kabadan qoysaska aan lahayn ceymiska dadweynaha ama dheefaha ama caymiska gaarka loo leeyahay.

(f) Bixiyeyaasha wax ka qabashada xili hore waxay:

(1) Sida ku cad 34 CFR §§303.414 iyo 303.520(a)(3)(i), waxeey siinayaan ogeysiis qoraal ah qoysaska ka diiwaangashan Apple Health ee Caruurta / Medicaid iyaga oo ogeysiinaya in macluumaadka shaqsiga lagu garan karo loo sheegi doono Apple Health ee Caruurta / Medicaid sababtuna waa in lagusoo dalaco biilka adeegyada wax ka qabashada xili hore ee la siiyay ilmahooda.

(2) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520(a)(3)(iii), u sheegaya qoysaska in ay xaq u leeyihiin in ay ka laabtaan oggolaanshahooda siidaynta macluumaadka shakhsiga lagu garan karo ee loo isticmaalaya kudalicista biilka waqti kasta.

(3) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520 (a) (3) (iv), bixin bayaan qoran oo ku saabsan qaybaha guud ee kharashyada qoysku ay geli garaan, taas oo ka dhalatay adeegsiga Apple Health ee Caruurta / Medicaid.

(g) Bixiyeyaasha wax ka-qabashada xili hore ma bixin doonaan qiimaha qaddarka lacagta caymiska ee loogu talagalay Apple Health ee carruurta / Medicaid.

(h) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520(a)(2)(iii), haddii waalidku uusan bixin rukhsad si uu isaga diiwaangaliyo ama u galo Apple Health ee Caruurta / Medicaid, bixiyayaasha wax ka qabadka hore waa inay wali sii diyaariyaan adeegyada waxqabadka xiliga hore ee Qaybta C IFSP oo waalidku siiyay ogolaansho. Rukhsad bixin la'aanta ee adeegsiga Apple Health loogutalaglay Caruurta / Medicaid looma isticmaali doono in lagu daahiyo ama loogu diido adeegyada hoos yimaada qaybtan ilmaha ama qoyska.

(i) Marka u-qalmitaanka Apple Health ee Caruurta / Medicaid aan la xaqiijin karin ama qoysku uu diiday inuu bixiyo macluumaadka dakhliga iyo qarshka, qoyska waxaa looga baahan doonaa inay raacaan Nidaamka lacag Bixinta iyo Siyaasada Khidmadaha Washington.

**14.B.6 Adeegsiga Caymiska Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah / Caymiska**

(a) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520(b)(1)(iii), qoysaska waxaa la siin doonaa Nidaamka Bixinta lacagta iyo Siyaasada Khidmadaha ee ESIT, kahor inta aan la isticmaalin caymiska daryeelka gaarka ee cunugga ama waalidka / caymiska si loogu bixiyo adeegyada Qeybta C.

(b) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520 (b) (1) (i), Bixiyeyaasha wax ka qabashada xili hore waa inay helaan ogolaanshaha waalidka ee:

(1) Adeegsiga caymiska daryeelka caafimaadka gaarka ah ee qoyska / caymiska si loogu bixiyo bixinta hore adeegyada wax-ka-qabashada xili hore ee kujira IFSP;

(2) Adeegsiga caymiska daryeelka caafimaadka ee gaarka ah ee qoyska / caymiska si loogu bixiyo koror kasta ee inta jeer,baaxada, muddada ama xoojinta adeegyada IFSP-da ilmaha.

(c) **Balan qaad:** Sida ku xusan 34 CFR §303.521 (a) (4) (iv), qoysaska leh ceymiska gaarka loo leeyahay laguma soodalici doono in kabadan qoysaska aan laheyn ceymiska dadweynaha ama dheefaha ama caymiska gaarka loo leeyahay.

(d) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520(b)(1)(ii), bixiyeyaasha wax ka qabashada xili hore waxay bixin doonaan bayaan qoran oo kusaabsan qaybaha guud ee kharashaadka qoyska geli karaan oo kadhalatay isticmaalka caymiska daryeelka caafimaad ee gaarka loo leeyahay / caymiska, sida:

(1) Isla-bixinta lacagta, wadajirka caymiska, khidmadaha caymiska, ama wax kale laga jaro ama kharashyo kale oo muddada dheer ah, sida dhuminta dheefta sababta oo ah waxaa lajoojiyay caymiska daryeelka caafimaadka ee sanadlaha ama nolosha dhan / caymiska ee hoos yimaadda sharciga caymiska ee ilmaha, waalidka, ama ilmaha xubnaha qoyska;

(2) Suurtagalnimada ah in adeegsiga caymiska daryeelka gaarka ah ee qoyska / caymiska ay si xun u saameyn kart u helitaanka caymiska caafimaadka cunuga naafada ah, waalidka, ama xubnaha qoyska cunugga ee hoos imanaya sharciga. iyo caymiska daryeelka caafimaad / caymiska waa la joojin karaa sababtuna tahay adeegsiga sharciyada caymiska si loogu bixiyo adeegyada wax ka qabashada hore ee Qaybta C; ama

(3) Suuragalnimada ah in caymiska daryeelka caafimaad / lacagta caymiska laga yaabo inay saameyso isticmaalka ceymiska gaarka loo leeyahay si loogu bixiyo adeegyada wax-ka-qabashada xili hore.

(e) Bixiyeyaasha wax ka-qabashada xili hore ma bixin doonaan qarashka caymiska daryeelka caafimaadka / caymiska.

(f) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520(a)(2)(iii), haddii waalidku uusan bixin rukhsad si uu uhelo caymiska daryeelka gaarka ah / caymiska, bixiyayaasha wax ka qabadka xili hore waa inay wali diyaar kadhigaan adeegyada waxqabadka xili hore ee Qaybta C ee IFSP kaas oo waalidku siiyay ogolaansho. Oggolaansha la'aanta looma adeegsan doono in lagu daahiyo ama loo diidi karo wax adeegyo ah ubadka ama qoyska. Markuu waalidku ama qoysku aysan bixinin ogolaanshaha si loo helo caymiska daryeelka caafimaadkooda gaarka ah / caymiska, qoyska waxaa laga rabaa inay raacaan Nidaamka Bixinta lacagaha iyo sharciga Khidmadaha Washington.

(g) Dhamaan qoysaska lagu soo dalacay qarashka isla-bixinta, wadajirka-caymiska, ama laga jaro, lacagaha kale ee hay'adda, oo ay kujirto Qeybta C bixiyaha lacagaha ugu dambeeya, ayaa loo isticmaali karaa in lagu daboolo kharashyadaan.

(h) Qoysaska 90 maalmood dayacay wajibkooda bixinta lacagta isla-bixinta, wadjirka-caymiska, ama waxyaabaha laga goyn karo waa laga joojinayaa adeegyada kaqeybgalka Qiimaha Qoyska ilaa qorshaha lacag lagu bixinayo ladejiyo. Tani waxay dhacdaa ka dib marka la siiyo qoyska ogeysiis qoraal ah, Isuduwaha agabyada Qoyska, iyo bixiyaha adeega la ogeysiiyo.

### 14.B.7 Qeexidda Awooda Waalid ee qarash bixinta

ESIT waxay ku qeexday **Awoodda qarash bixinta** sida wadarta guud dakhliga qoyska ee sanadlaha la isku habeeyey ee kahoos maro ama ka sarreeya 200% Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL), oo loo habeeyay kharashyada aan la soo celin karin oo ka badan 10%.

(a) Dakhliga iyo macluumaadka kharashka ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo awoodda qoysku u leeyahay inuu bixiyo khidmada bil kasta.

(b) Kharashyada aan la celin karin ee la ogolyahay waxaa ka mid ah: Kharashaadka caafimaadka iyo ilkaha oo ay ku jiraan khidmadaha caymiska, lacagta laga jaro, lacagta la isla bixiyo, iyo caymiska la wadaago

  (1) Kharashaadka caafimaadka iyo ilkaha oo ay ku jiraan khidmadaha caymiska, lacagta laga jaro, lacagta la isla bixiyo, iyo caymiska la wadaaga

  (2) Daaweynta caafimaadka dhimirka ee aan caymiska kujirin

  (3) Daryeelka caafimaadka guriga oo ay bixiso hay'ad caafimaad oo shati leh

  (4) Masruufka carruurta / lacagta lasiiyo xaaska lafuray

  (5) Kharashaadka xanaanada cunugga ee lagalay xiliga waalidku (waalidiinta) ay shaqeeyaan ama iskuulka aadaan.

(c) Kahor biilka lagusoodalacay caymiska daryeelka caafimaadka dadweynaha / caymiska ama caymiska daryeelka gaarka loo leeyahay / caymiska, qoysaska waxaa la weydiisan doonaa inay dib u eegaan oo ay buuxiyaan Ogeysiiska Qoraalka Hore, Oggolaanshaha isticnaalka Caymiska Dadweynaha iyo / ama Gaarka ah, iyo Foomka Xaqiijinta Dakhliga iyo Kharashaadka oo ay ku jiri doonaan waxyaabaha soo socda:

  (1) Maclumaadka dakhliga iyo qarashaadka;

  (2) Oggolaanshaha siidaynta macluumaadka shaqsiga lagu garan karo; iyo,

  (3) Oggolaanshaha si aad u gasho ceymiska dadweynaha iyo / ama caymiska gaarka loo leeyahay.

(d) Awooda qoysku ku leeyahay inay bixiyaan heerka waa in dib loo eegaa oo la cusboonaysiiyaa ugu yaraan si sanadle ah ama xili kasokeeya haddii qoysku codsado.

### 14.B.8 Qeexitaanka Awood la'aanta Waalidka ee Bixinta lacagaha

ESIT waxay ku qeexday **awood la'aanaanta bixinta kacagaha** sida wadarta guud ee dakhliga qoyska ee ka hooseeya 200% Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL), oo loo habeeyay kharashyada la bixin karo ee aan la celin karin oo ka badan 10%.

(a) Macluumaadka Dakhliga iyo Kharashaadka ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo awood la'aanta qoyska ee bixinta lacagaha

(b) Kharashyada aan la celin karin ee la ogolaan karo waxaa ka mid ah:

  (1) Kharashaadka caafimaadka iyo ilkaha oo ay ku jiraan khidmadaha caymiska, lacagta laga jaro, lacagta la isla bixiyo, iyo caymiska la wadaago

  (2) Daaweynta caafimaadka dhimirka ee aan caymiska kujirin

  (3) Daryeelka caafimaadka guriga oo ay bixiso hay'ad caafimaad oo shati leh

  (4) Masruufka carruurta / lacagta lasiiyo xaaska lafuray

  (5) Kharashaadka xanaanada cunugga ee lagalay xiliga waalidku (waalidiinta) ay shaqeeyaan ama iskuulka aadaan.

(c) Kahor biilka lagusoodalacay caymiska daryeelka caafimaadka dadweynaha / caymiska ama caymiska daryeelka gaarka loo leeyahay / caymiska, qoysaska waxaa la weydiisan doonaa inay dib u eegaan oo ay buuxiyaan Ogeysiiska Qoraalka Hore, Oggolaanshaha isticnaalka Caymiska Dadweynaha iyo / ama Gaarka ah,: iyo Foomka Xaqiijinta Dakhliga iyo Kharashaadka oo ay ku jiri doonaan waxyaabaha soo socda:

  (1) Macluumaadka Dakhliga iyo kharashka;

  (2) Oggolaanshaha siidaynta macluumaadka shaqsiga lagu garan karo; iyo,

  (3) Oggolaanshaha si aad u gasho ceymiska dadweynaha iyo / ama caymiska gaarka loo leeyahay.

(d) Awooda qoysku ku leeyahay inay bixiyaan heerka waa in dib loo eegaa oo la cusboonaysiiyaa ugu yaraan si sanadle ah ama xili kasokeeya haddii qoysku codsado

**14.B.9 Lacagta**

(a) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.521, qoysaska loo go'aamiyey in ay leeyihiin "awood ay ku bixiyaan lacagaha" ESIT waxay dejisay khidmad bilkasta loogutalagalay adeegyada wax ka qabashada xili hore taas oo laxiriirta Kaqeybgalka Qiimaha Qoyska marka ay wax ay dhacaan wax kamid ah kuwa soo socda midkood:

   (1) Qoysku waxay diidayaan adeegsiga caymiska daryeelka caafimaadkooda gaarka ah / caymiska;

   (2) Qoysku waxay diidayaan u adeegsiga Apple Health ee carruurta / caymiska daryeelka caafimaadka dadweynaha / caymiska caafimaad ee Medicaid waxayna leeyihiin dakhli sannadeed la isku hagaajiyay oo ka sarreeya 200% FPL; ama

   (3) Qoysku ma lahan midkood Apple Health ee Caruurta / Medicaid ama caymiska daryeelka caafimaadka gaarka ah / caymiska.

(b) Qoysaska kuwaas oo diida inay bixiyaan dakhliga iyo macluumaadka kharashkooda waxaa laga qaadi doonaa khidmad bille ah heerka ugu sarreeya iyadoo lagu saleynayo cabirka qoyska, iyadoo la xisaabinayo qaddarka kasta oo laga helo ilaha kale ee dadweynaha oo laga helo bixinta adeegyadaas.

(c) Jadwalka Bixinta Lacagta Billaha ah waxaa la aasaasay iyadoo lagu saleynayo Tilmaamaha Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL) waxaana loo cusboonaysiin doonaa si sannadle ah.

(d) Haddii qoysasku bixiyaan ogolaansho si loo helo ceymiskooda dadweynaha iyo / ama caymiska gaarka loo leeyahay ee bixinta adeegyada wax ka-qabashada xili hore ee laxiriira kaqeybgalka Qiimaha Qoyska, ma bixin doonaan khidmad bille ah.

(e) Qoysaska ka diiwaangashan Apple Health ee Caruurta / Medicaid, waxay heleen sifaha qeexitaanka "awood la'aanta bixinta ", iyo diiditaanka isticmaalka ilaha maalgelintan loo isticmaalo bixinta lacagta Qeybta C ee wax kaqabashada xili hore, dhammaan adeegyada Qeybta C ee lagu aqoonsaday cunugooda IFSP waxaa loogu adeegi doona bilaash Intaa waxa u dheer, awood la'aanta qoysku in ay bixiso lacag ma keenayso dib u dhac ama in la diido adeegyada Qaybta C.

(f) Qoysaska aan ka diiwaangashanayn Apple Health ee Caruurta / Medicaid oo u diiday inay bixiyaan macluumaadka dakhliga iyo kharashkooda waxaa laga qaadi doonaa khidmad bille ah heerka ugu sarreeya iyadoo lagu saleynayo cabirka qoyska, iyadoo la xisaabinayo qaddarka kasta oo laga helo ilaha kale ee dadweynaha oo laga helo bixinta adeegyadaas.

(g) Qoysaska diida isticmaalka caymiska daryeelka caafimaadkooda gaarka ah / caymiska, oo bixiyay dakhli iyo macluumaad kharash ayaa laga qaadi doonaa khidmad bille ah oo ku saleysan cabirka qoyska iyo dakhliga sannadlaha la habeeyay.

(h) Qoysasku waxay weydiisan karaan ineey yeshaan dib-u-go'aaminta khidmaddooda bil kasta mar kastoo isbadal ku yimaado tirada qoyska, dakhliga iyo / ama kharashaadka. Dib-u-habeyn kasta oo lagu sameeyo khidmadda billaha ah ayaa dhici doonta kadib dib-u-go'aaminta la sameeyo.

(i) Qoysaska 90 maalmood dayacay wajibkooda bixinta lacagta isla-bixinta, wadjirka-caymiska, ama waxyaabaha laga goyn karo waa laga joojinayaa adeegyada kaqeybgalka Qiimaha Qoyska ilaa qorshaha lacag lagu bixinayo ladejiyo. Tani waxay dhacdaa ka dib marka ogeysiis qoraal ah la siiyo qoyska, Isuduwaha agabyada Qoyska, iyo bixiyaha (yaasha) adeegyada.

**14.B.10 Shuruudaha Habraaca Talaabooyinka Illaalinta**

(a) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.521(e), qoysaska waxaa la siin doonaa koobi Nidaamka Bixinta iyo sharciga Khidmadaha taasoo sharraxaysa hanaankooda nidaamiya ee la xiriira:

(1) Soo rogista lacagaha;

(2) Go'aanka gobolka ee awoodda waalid ama awood la'aanta inuu bixiyo; iyo

(3) Kudalacista biilka caymiska dadweynaha ama kan gaarka loo leeyahay

(b) Waalidku waxay xaq u leeyihiin:

(1) Kaqeeyb galaaan dhexdhexaadinta sida kucad 34 CFR §303.431:

(2) Codsadaan dacwad dhageys ee hoos imaanaysa 34 CFR §303.436 ama §303.441, mid kastoo ku habboon

(3) Xareeyso fayl cabasho gobol sida ku xusan 34 CFR §303.434 iyo / ama

(4) Qaab kasto kale oo ay dejisay gobolku si loo dedejiyo xallinta sheegashada maaliyadeed

(c) Sida ku cad 34 CFR §303.521 (e) (2) (i) Bixiyeyaasha ESIT waxay siinayaan waalidiinta markay codsanayaan nuqul qoraal ah ee Nidaamka Lacag Bixinta iyo sharciga khidmadaha:

(1) Oggolaanshaha bixinta adeegyada wax-ka-qabashada xili hore waxaa laga helaa kulanka Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shakhsiyadeed (IFSP); iyo

(2) Oggolaanshaha adeegsiga caymiska gaarka ah si loogu bixiyo adeegyada Qaybta C.